

Telefoonka laga caawiyo haweenka sida xun loola dhaqmey ee 24 ka sacadood ah waa *1-866-863-0511* Telefoon iyo TTY *1-866-863-7868*

Qadkani waa gargaarka deg dega ah ee haweenka Ontaariyo ee dulman ama la xumeeyay. Adeegani waa qarsoodi ama sir, qof lagaaga sheegayo ma jirto. Qadka ama laynka dhibaatooyinka haweenka waa lacag la'aan, biilka telefoonkaadana kama muuqan doono. Adeegyadaan waxaa lagu heli karaa 154 luqadood.

Wixii faahfaahin ah ee adeegyada haweenka sida xun loola dhaqmey ama la xumeeyey Booqo website-kan: *www.awhl.org*

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan ololaha Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska booqo website-kan: *www.neighboursfriendsandfamilies.on.ca*

Haddii aad ka walwalsan tahay amaankaada gaar ahaaneed waco booliska.

Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska.

*Tusaalooyinka
qorshaha
amaanka
haweenka
sida xun loola
dhaqmey.*



Qorshe amaanka waa mudnaanta ugu sareeyso.

Waa kuwan dhowr waxyaabood oo muhiim ah oo aad kor ugu qaadi karto amaankaada.

- 1 Oof aad ku kalsoon tahay ama aad aaminsan tahay u sheeg sida xun ee laguula dhaqmay.
- 2 Uruurso dukumintiga muhiinka ah: dhamman warqadaha aqoonsiga, waraaqaha xisaabaadka iyo maxkamadaha, kuwa kirada ama ijaarka guriga, buuga cinwaanada, waraaqaha dawooyinka iyo lacagta/kaararka deynta.
- 3 Isu gee masawirada qiimaha leh, dahabka iyo wixii alaab ah oo qiimo leh, alaabta ay carruurta ku ciyaaraan iyo wixii carruurta ay xiiseynayaan.
- 4 Qaado masawirka lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey iyo kan carruurtaada.
- 5 La xiriir hoyga haweenka dulman ama booliska waxaanad weydiisataa sarkaal ku takhasuusey arimaha haweenka dulman ama la xumeeyay. Isaga/iyada ayaa kaa caawinaaya sidaad u qorshayn lahayd amaankaada.
- 6 La tasho garyaqaan. Hayso wixii cadayn ah ee nabaro lagu gaarsiiyey (sida sawiro) hayso diiwan aad geliso dhawacooyinka gacan saarka ah oo dhan adigoo qoraaya taariikhda, waxa dhacay, handadaadda iyo markhaatiyadaba.
- 7 Hubi in iskuulka carruurta iyo xarunta xanaanada carruurta ay ogyihiin/xaaladaadda, waxaanad siisaa nuqul dokumentiga arintan khuseeya.
- 8 Ha u sheegin lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey in aad ka tageysid. Si deg deg ah uga tag.
- 9 Ha ku noqon gurigada ama aqalkaada iyadoon boolis kula socdo/weheliyo mooyaane.
- 10 Haka hor iman lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey.